# **Baadhitaanka** Licensing Division (Waaxda Liisamada, LD) / **Child Protective Services (Adeegyada Ilaalinta Caruurta, LD/CPS)**

***S'aalaha badanaa la iska waydiiyo Mulkiilayaasha & Maamulayaasha Daryeelka Ilmaha***



**Q: Waa maxay LD/CPS oo waa maxay kaalintoodu?**

**A:** *Licensing Division Child Protective Services (Waaxda Liisamada ee Adeegyada Ilaalinta Ilaha, LD/CPS) ee ah jirdilid, faraxumeyn, habdhaqan dayacaad ah iyo/ama xannaano xun, falal suuqgelin ama ganacsi galmo ah iyo nafgoyn ilma aan dhalan ama aan qaangaarin.*

**Q: Yay ku waajib tahay inuu ka warbixiyo tacadi ama dayacaad?**

**A:** *Hadii aad kamid tahay dadka ay ku* ***waajib tahay ka warbixintu*** *(Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg qoraalka* Reporting Child Abuse or Neglect (Ka Warbixinta Daycaada ama Tacadiga Ilme) (CWP_0040) *oo onleyn ah:* ***https://www.dcyf.wa.gov/publications-library/CWP_0040****), waxa uu khasab kaaga dhigay sharcigu in aad wixii walaac ah gaadhsiiso the Department of Children, Youth & Families (Waaxda Caruurta, Dhalinyarta & Qoysaska, DCYF), Khadka Tooska ee Tacadiga Ilmaha (1-866-ENDHARM) ama bilayska* ***RCW 26.44.030*** *(****https://apps.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=26.44.030****) Lambarada qaadashada deegaanka iyo macluumaadka si aad uga warbixiso tacadiga iyo dayacaada ilmaha oo ku taala* ***www.dcyf.wa.gov/safety/report-abuse****. Haddii dacwaddu ay ka dhan tahay goob xannaano carruur oo shati la siiyey, ama goob shatiga sugeysiga, kiis ahaan ayaa danbi-baaristooda loogu gudbinayaa LD/CPS.*

**Q: Mi jiraan wax uu kala kulmayo ruuxa warbixin been ah gudbiya?**

**A:** *Sida uu dhigayo* ***RCW 26.44.060*** *(****https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=26.44.060****) ruuxa, si ula kac ah oo ku xumayn ah, oo og warbixin been ah u gudbiya oo tacadi ama dayacaad ilme waxaa lagu heleyaa danbi oo waxaana lagu sheegey ganaaxiisa* ***RCW 9A.20.021*** *(****https://apps.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=9A.20.021****).*

**Q: Sidee ayaan ku ogaanayaa in ruux la baadhayo iyo in barnaamij la baadhayo?**

**A:** *Baadhayaasha LC/CPS ee ruux ama dad ee ku kacay tacadiga ama dayacaada. Wixii mushkilad ama tabasho ah ee la xidhiidha liisanka ama barnaamijka waxaa baadha cida liisanka bixisa.*

**Q: Boolis ma ku lug yeelanayaan?**

**A:** *Bilayska waxaa la ogaysiinayaa dambiga lagu eedeeyay. Waxaa awood u leh bilayska hadii ay ku qorayaan baadhe.*

**Q: Waa maxay masuuliyadaha baadhitaanka CPS?**

**A:** *Maamule ahaan daryeelka ilmaha adiga ayaa ka masuul ah in aad u diyaariso caruurta iyo shaqaalaha baadhaha. Waxa aad si toos ah ugala shaqayn doontaa cida liisanka ku siisay wixii mushkilad ah ee shaqalaaha ama liisanka la xidhiidha.*

**Q: Xuquuq sidee ah ayaan leeyahay nidaamkan?**

**A:** *Bixiyaha Daryeelka Ilmuhu waxa uu leeyahay xuquuq oo waxaa lagu dhiiri gelinayaa inuu kala tashado looyar wixii su'aalo ah ee ku saabsan xuquuqdooda inta uu socdo baadhitaanka LC/CPS.*

**Q: Wakhti intee le'eg ayuu nidaamka baadhitaanku qaadan doontaa?**

**A:** *LD/CPS waxay hasytaan 45 maalmood sida uu dhigayo xeerka dhamaystirka baadhitaanku, laakiin mudo ka dheer ayay qaadan kartaa iyada oo ku xidhan xaalada. Sharciyan, baadhitaanku kama badan karo 90 maalmood iyada oo hay'ada bilayska ama dacwad ooguhu uu sheego moojee in mudada baadhitaankaan oo ka dheer in loo baahan yahay.*

**Q: Ma in aan ogolaadaa in caruurta la waraysto bilaa ogolaanshe waalid?**

**A:** *Haa. LC/CPS waxay wargelin doontaa waalidka wakhti hore oo aan baadhitaanka waxba yeelaynin. Badanaa LC/CPS waxay la hadlaan waalidka kahor waraysiga. Laftaadu ha wargelinin waalidka maadaama oo ay faro gelin baadhitaanka ah noqonayso.*

**Q: Hadii baadhe uu dalbado liiska macluumaadka xidhiidhka oo dhamaystiran oo qoysask ku jira ah, xataa hadii caruur gaar ah dhacdadu ku saabsan tahay, miyuu siinayaa bixiyuhu macluumaadkaas?**

**A:** *Haa. Sida uu dhigayo* ***RCW 26.44.030*** ***(https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=26.44.030)*** *waaxdu waa inay heshaa dhamaan duwaanada la xidhiidha ilmaha ee ay hayaan cida ay ku waajib tahay inay ka warbixiyaan iyo shaqaalahooda..*

*Sidoo kale, sida uu dhigayo* ***WAC 110-300-0035(2)(c) (https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300&full=true#110-300-0035)****;* ***110-301-0035(2)(c) (https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-301-0035)****; iyo* ***110-302-0035(2)(c) (https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-302-0035)****, waaxdu waxay diidi kartaa, joojin kartaa, ka noqon kartaa, ama ayna sii wadi karin liisanka marka cida liisanka la siiyay ay siido inay u ogolaato shaqaalaha waaxda ee awooda u leh inay helaan wax kamid ah kuwa soo socda: Duwaanada ama faylasha Ilmaha, shaqaalaha, ama barnaamijka.*

**Q: Yay tahay inuu joogo marka shaqalaaha la waraysanayo?**

**A:** *Macluumaadka la heley mudada baadhitaanka LD/CPS waa sir. Waxaa isla leh ikhtiyaarka waraystaha hadii uu doonayo inay joogaan cid kale ilaa inta cida kale aan loo arkin cid waxyeeli karta baadhitaanka.*

**Q: Waa maxay shuruucda ku saabsan kala xidhiidha shaqaalaha daryeelka ilmaha taleefankooda shakhsi ahaaneed?**

**A:** *LD/CPS waxaa la siin karaa macluumaadka xidhiidhka waalidka, caruurta, ama shaqaalaha. Ka warbixiye waajib ay ku tahay ahaan, sida uu dhigayo* ***RCW 26.44.030 (https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=26.44.030)****, daryeelka ilmaha waa inuu siiyo LD/CPS wixii duwaano ah ee munaasab ah.*

**Q: Miyuu shaqaalaha daryeelka ilmahuhu diidi karaa wixii su'aalo ah?**

**A:** *Shaqaaluhu waxay dooran karaan in aan la waraysan. Natiijadu waxay weli soo bixi doontaa iyada oo aan xogtooda laga qaadin oo waxay ku salays naan doontaa wixii ka uruuriyay inta baadhitaanku socday.*

**Q: Khayraad sidee ah ayaa la heleyaa inta uu socdo baadhitaanka CPS?**

**A:** *Waxaa jira khayraad kala duwan oo la heli karo oo ku xidhan nooca xarunta la baadhayo. Helitaanka khayraadka iyo tobobarka* ***websaytka Ka Warbixinta Waajibka ah****.* ***(https://www.dcyf.wa.gov/safety/mandated-reporter)***

**Q: Waa maxay jawaabta?**

**A:** *Danbi-baaraha LD/CPS ayaa go'aaminaya haddii ay dacawadu tahay heer dhibaateyn ama dayacaad ah sida ku qeexan sharciga gobolka ee* ***RCW 26.44.020 (https://app.leg.wa.gov/RCW/default.aspx?cite=26.44.020)****. Dacwa kasta waa faldanbiyeed jira ama mid aan jirin.*

***Faldanbiyeedka jira waa:*** *Mid lagu saleeyey macluumaadka la hayo, oo waa inay u badan tahay in dhibaateyn ama dayacaad dhacday.*

***Faldanbiyeedka aan jirin waa:*** *Mid lagu saleeyey macluumaadka la hayo, oo waa inaysan u badneyn inay dhibaateyn ama dayaacaad dhaceen, ama in la waayey caddeyn ku filan in la go'amiyo haddii dacwada dhibaateynta carruurta ah dhacday ama aysan dhicin.*

*LD/CPS waxay awood u leeyihiin danbi-baaris ah wixii halis ah oo keliya. Danbi-baarista wixii halis ah oo keliya waa qiimeynta halista hadda jirta ama mustaqbalka ku imaan karta carruurta goobta lagu hayo.*

**Q: Sidee ayaa la ii soo wargelin doonaa marka baadhitaanu dhamaado?**

**A:** *Warqad ayaa loo diri doonaa cida baadhitaanka lagu wado iyo waalidka ilmaha la sheegey inuu yahay dhibanaha dhamaadka baadhitaanka. Wargelinta waxaa ku jira natiijada iyo talaabada xigta hadii ay ku munaasab tahay. Maamulka daryeelka ilmuhu ma heli doono wargelin ama warbixin la socota LD/CPS laakiin waxa uu ka heli doonaa macluumaakda soo socda cida liisanka siisay. Nuqulka Qiimaynta baadhitanaka waxaa laga heli karaa* ***Bixinta Shacabka ee****.* ***(https://dcyf.wa.gov/public-records) dcyf.publicdisclosure@dcyf.wa.gov****.*

**Q: Sidee ayaan rafcaan uga qaadanayaa go'aanka? Waa maxay nidaamka rafcaanku?**

**A:** *Nidaamka waxa uu sheegi doonaa warqada natiijada ee la heley dhamaadka baadhitaanka. Ka hel macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Dhagaysiga Maamulka,* ***Cutubka 110-03 WAC (https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-03&full=true)****.*

**Q: Yaan la xiriira karaa haddii aan su'aal ka qabo danbi-baarista?**

**A:** *Haddii aad su'aal ama cabasho ka qabto sida kiiskaga looga shaqeynayo, fadlan la xiriir maamulaha danbi-baaraha ugu horreyn. Haddii aad u maleyneyso in aan arrinta la xallin, la xiriir LD ee badqabidda iyo ka-warhaynta ee deegaankaaga.*

*Si aad mar kasta caawimaad u hesho waxaad* ***Office of Constituent Relations (Xafiiska Xiriirka Dadweynaha) kala xiriiri kartaa (https://dcyf.wa.gov/contact-us/constituent-relations)*** *at 1-800-723-4831 wixii kaalmo ah.*

---

*DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, xaalada dhalashada Maraykanka ama soo geleytiga, da'da, rabitaanka galmo ama aqoonsiga jinsiga, xaalad ciidan ama ciidan hawlgabay, xaalada hooyada naas nuujinaysa, iyo jiritaanka wixii kale ee laxaad la'aan jidheeh, dareen ama maskaxeed ama isticmaalka xayawaanka ruuxa hagaha. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhada Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka* ***communications@dcyf.wa.gov****.*